


Hay'adda Istaatistikada Qaranka (HIQ)



TUSAHA SICIRKA BADEECADAHA

Febraayo 2021

Warbixin kooban

Dhammaan qeybaha Tusaha Sicirka Badeecadaha (TSB) bisha Febraayo 2021 ayaa ahaa 119.88, marka la barbardhigo 118.83 bishii Janaayo 2021.

Isbedel biledka, Febraayo 2021, marka la barbar dhigo Janaayo 2021, ayaa sare u kacay 0.91 boqolkiiba. Tan ayaa imaanaysa, marka labarbardhigo hoos u dhac bille ah oo gaaraya -1.15 boqolkiiba bishii Janaayo 2021. Sare u kac biledka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha **Caafimadka** (+3.86%). Qiima kororka ugu badan ayaa ka dhashay sare u kac ku yimid Agabka caafimaadka (+14.68%). Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Kaniiniga Baristamoolka 500mg (+100.00%) iyo Imbishiliinka (+20.00%) (Jaantuska 2)

Guud ahaan, sicir bararka 12kii bilood ee la soo dhaafay (Febraayo 2020 iyo Febraayo 2021) ayaa muujinaya in dhammaan qeybaha TSB uu sare u kacay 5.03 boqolkiiba, Marka la barbardhigo 5.00 boqolkiiba ee 12kii bilood (Janaayo 2020 iyo Janaayo 2021).

Shaxda 1: Tusaha Sicirka Badeecadaha; Febraayo 2021 (Dec 2014 = 100)


Tusaha Sicirka Badeecadaha, Febraayo 2021	
Tusaha bishan (Febraayo 2021)	119.88
Tusaha bishii hore (Janaayo 2021)	118.80
Tusaha sanadkii hore (Febraayo 2020)	114.13
Isbedelka bilaha ah boqolkiiba %	0.91%
Isbedelka heerka sicir bararka sanadlaha ah boqolkiiba %	5.03%

Heerka sicir bararka marka loo eego TSB

Isbedelka Boqoleyda ee 12Bilood

Tixraaca TSB

Index = 100 @ December 2014



Isha xogta: NBS

War bixin biledka bisha **Febraayo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Agaasinka <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Guud ahaan heerka Sicir Bararka: Dhammaan Qeybaha TSB, Febraayo 2021

Heerka sicir-bararka bisha Febraayo 2021 waa isbedelka boqolleyda ee Tusaha sicirka badeecadaha (TSB) ee 12kii bilood ee la soo dhaafay, Febraayo 2020 iyo Febraayo 2021.

Dhammaan qeybaha TSB ayaa sare u kacay 5.03 boqolkiiba 12kii bilood ee la soo dhaafay, Febraayo 2021 iyo Febraayo 2020, marka la barbardhigo 12kii bilood ee Janaayo 2020 iyo Janaayo 2021 oo ahaa 5.00 boqolkiiba.

Dhammaan qeybaha TSB isbedelka billaha ah ayaa sare u kacay 0.91 boqolkiiba bisha Febraayo 2021, marka labarbardhigo hoos u dhac dhan -1.15 boqolkiiba bishii Janaayo 2021.

Guud ahaan heerka sicir bararka: qeybo ka mid ah badeecadaha, Febraayo 2021.


Sicir bararka qeybaha **cuntada iyo cabitaanada, guryaha, biyaha, korontada iyo gaaska** ayaa ah kuwa ugu saameynta badan badeecadaha oo dhan looguna isticmaalka badan yahay dhammaan qeybaha TSB.

Cuntada iyo Cabitaanada ayaa qiimahooda bilaha ahi hoos u dhacay 0.33 boqolkiiba, inta lagu jiray bisha Febraayo 2021 marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya -2.74 boqolkiiba bishii Janaayo 2021. Tani ayaa sababtay in qaar ka mid ah cuntada quutul daruuriga ah oo qiimahoodu sare u kacay. Sicir bararka sanadlaha ah ayaa gaaray 0.01 boqolkiiba Febraayo 2021. marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah oo gaaray 1.18 boqolkiiba Janaayo 2021.

Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaaska ayaa laga dareemay sare u kac bille ah oo dhan 1.08 boqolkiiba intii lagu guda jiray Febraayo 2021, marka la barbardhigo hoos u dhac gaaraya 0.49 boqolkiiba bishii Janaayo 2021. Sare u kac sanadlaha ah ee bisha Febraayo 2021 ayaa gaaray 9.82 boqolkiiba, marka la barbardhigo sicir bararka sanadlaha ah ee bishii Janaayo 2021 oo ahaa 9.16 boqolkiiba.

dhamaan qeyaha TSB & qeybaha la xushay

Index = 100 @ December 2014




Isha xogta: NBS

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

A. Qeybaha ugu weyn ee isbedelka Sanadlaha ah (TSB)

Jaantuska 1: Sicir bararka sanadlaha ee dhamaan qeybaha; Febraayo 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee sicirkoodo Kordhay (+):

- **Caafimaadka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah oo gaaraya 23.34 boqolkiiba bishii Febraayo 2021. Sare u kaca waxa sababay qiima koror ku yimid adeega Cusbitalada oo gaaray (+89.73 boqolkiiba). Sare u kaca ayaa ka yimid adeega daweynta bukaanada oo noqday (+150.00 boqolkiiba).
- **Guryaha, Biyaha, Korontada iyo Gaas** ayaa muujiyey sare u kac Sanadle ah oo gaaraya 9.82 boqolkiiba bisha Febraayo 2021, sare u kaca ugu weyn ayaa ahaa qiimaha kirada guryaha (16.65 boqolkiiba). qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha ay bixiyaan kireystayaasha sida, Apartment-ga (+20.93 boqolkiiba).
- **Dharka iyo Kabaha** ayaa sicirkooda sanadlaha ahi sare u kacay 19.22 boqolkiiba. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid qiimaha dharka (+19.25 boqolkiiba) iyo kabaha (19.09 boqolkiiba) taasoo ka dhalatay sare u kac ku yimid dharka dumarka oo gaaray (+25.15 boqolkiiba), caruurta (23.15 boqolkiiba) iyo kabaha oo ahaa (+19.09).
- **Alaabaha yaryar & Adeegyada** ayaa sameeyey sare u kac sanadle ah oo gaaraya 14.16 boqolkiiba Febraayo 2021. Sare u kaca waxaa sababay saameynta shakhsi ahaaneed oo qiimahoodu gaaray (+14.59 boqolkiiba). Qiima kororka ugu badan ayaa ka yimid qiimaha Dahabka iyo Saacadaha (+17.13 boqolkiiba).
- **Agabka Guryaha, Qoysaska iyo Dayactirka** ayaa muujiyey sicir barar sanadle ah 9.38 boqolkiiba ee Febraayo 2021, marka la barbardhigo 8.52 boqolkiiba oo la diiwaan geliyey bishii Janaayo 2021. Sare u kaca ugu badan ayaa ka yimid agabka guryaha (+14.34 boqolkiiba).
- **Isgaarsiinta** ayaa laga dareemay sare u kac gaaraya 6.71 boqolkiiba Febraayo 2021. Qiima koror ka ugu badan ayaa ka yimid adeega telefoonada oo gaaray (+9.99%).


Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Febraayo 2021 (-)

- **Tubaakada** ayaa sameysay hoos u dhac sanadle ah oo gaaraya -6.30 boqolkiiba Bishii Febraayo 2021. Sida la wariyey hoos u dhaca ugu weyn ayaa ahaa in qiimaha Qaadka uu ahaa mid aan fadhin bishii Febraayo 2021, dhaqdhaqaaqa qiimaha tubaakada ayaa ah mid sabaynaya.

B. Qeybaha ugu waa weyn ee saameeya TSB -da

War bixin bileedka bisha **Febraayo 2021** (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Jaantuska 2: TSB; Isbedelka Sicirbararka ee bilaha dhamaan qeybaha; Febraayo 2021 (Dec 2014 = 100)



Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu kordhay Bisha Febraayo 2021 (+)

- **Caafimaadka** ayaa sare u kacay 3.86 boqolkiiba intii lagu guda jiray bishii Febraayo 2021 halka 0.56 la diiwaan galiyey bishii Janaayo 2021 . Sare u kaca ugu badan waxaa sababay alaabada caafimaadka oo gaaray (+14.68 boqolkiiba).
- **Maqaayadaha iyo hoteelada** ayaa sare u kacay 3.49 boqolkiiba bishii Febraayo 2021, halka -3.59 boqolkiiba la diiwaan galiyey bishii Janaayo 2021. Hoos u dhaca ugu weyn ayaa ahaa maqaayadaha, Kafeyga iyo wixii la mid ah (+5.75 boqolkiiba).
- **Gaadiidka** ayaa sameeyey sare u kac dhan 2.00 boqolkiiba intii lagu guda jiray bishaa febraayo 2021, halka la diiwaan geliyey 0.04 boqolkiiba bishii Janaayo 2021. Sare ukaca ugu badan ayaa ka yimid shidaalka iyo olyadda iyo garaasadda 12.80 boqolkiisa, waxaa sare u kaca ka qeyb qaatay qiima koror ku yimid batroolka (+21.43 boqolkiiba) and Naftda (+14.29 boqolkiiba) si kala sareyn leh.

Qeybaha ugu weyn ee Sicirkoodu hoos u dhacay bisha Febraayo 2021 (-)

Guud ahaan, majirin qeybaha TSB hoos u dhac la taaban karo oo bille ah Febraayo 2021.

Shaxda 2: Isbedelka tusaha sicirka ee qeybaha badeecadaha Febraayo 2021 ee habka (COICOP)

War bixin bileedka bisha *febraayo 2021* (TSB) iyo faahfaahinta xili waqtiyeedka xogta ayaa lagu baahiyaa, websitaka Hay'adda Istaatistikada Qaranka Soomaaliya. <http://www.nbs.gov.so> Twitter: @NBS_somalia

Habka kalasaarida caalamiga ee COICOP	TSB Weight	Febraayo 2020 TSB	Janaayo 2021 TSB	Febraayo 2021 TSB	% Boqolkiiba Bishan iyo Bishii hore	% Boqolkiib Isbedelka Sanadkii Hore iyo Sanadkaan
Dhamaan qeybaha TSB	100.00	114.13	118.80	119.88	0.91	5.03
Cuntada & Cabitaanada caadiga ah	46.04	119.83	119.46	119.85	0.33	0.01
Tubaakadda	1.25	137.08	125.61	128.44	2.25	-6.30
Dharka & Kabaha	5.03	121.89	144.97	145.31	0.24	19.22
Guryaha, Biyaha, Korontada & Gaaska	23.41	103.88	112.87	114.08	1.08	9.82
Agabka Guryaha	2.93	102.95	111.47	112.61	1.02	9.38
Caafimaadka	5.00	119.62	142.06	147.54	3.86	23.34
Gaadiidka	3.77	110.57	105.07	107.17	2.00	-3.07
Isgaarsiinta	2.80	96.32	101.31	102.78	1.46	6.71
Hawo bedeshada & dhaqanka	1.00	98.54	98.13	100.04	1.95	1.53
Tacliinta	4.00	107.75	109.80	109.80	0.00	1.91
Maqaayadaha & Hoteelada	2.00	136.61	133.78	138.44	3.49	1.35
Alaabaha yaryar & Adeegyada	2.77	105.00	118.96	119.86	0.76	14.16

Ogeysiis:

Tusaha Sicirka Badeecadaha waa sahan ku saabsan badeecad-aha iyo adeegyada ay isticmaalaan qoysaska caadiga ah. Xogta sahanka waxaa la soo ururiyaa Todobaadka koowaad iyo kan sedexaad ee bilkasta. Sicirka badeecadaha iyo adeegyada waxaa laga soo ururiyaa goobaha ganacsiga ee afarta suuq ee ugu waa weyn Magaaladda Muqdisho.


Soosaarida tan xigta

Tixraaca Sicirka Badeecadaha (TSB), Maarso 2021 waxaa la baahin doonaa 15 Abriil 2021. Wixii faahfaahin intaasi dheer ee ku saabsan (TSB) iyo xogaha kale ee rasmiga kala soco Xafiiska Istaatistiskada, Fadlan booqo Bogeena rasmiga ah ee <http://www.nbs.gov.so>

Lifaaqa 1aad: Dhammaan Qeybaha 'TBS' – qeybaha ka qeyb qaata heerka sicir-bararka bishii Febraayo 2021 marka loo eego COICOPka

dhamaan qeybaha TSB

Qeybaha ka qeyb qaata (%) heerka sicir bararka (COICOP)



Isha xogta: NBS

Lifaaqa 1aad wuxuu bixiyaa falanqeyn kusaabsan heerka sicir bararka ee Bisha oo loo qeybiyey iyo is barbardhiga qeybaha, ayada oo loo eegayo qeybaha COICOP loona soo bandhigayo sida ay u kalasaameyn badan yihiin (ka qeyb qaadashadsooda) dhamaan qeybahaha 'TSB ka.